# حماية الشأن العام والمصلحة العامة

## Dhowridda arrinka guud iyo danta guud

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

**(وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَى وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ)**

**(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Islaamka wuxuu dhisay dowlad dhab ah, wuxuu sugay tiirarkeeda, wuxuu u yeelay wixii toosin lahaa, wuxuuna ku boorriyay ilaalinteeda, iyo dafaaceeda, wuxuu ka dhigay dhowridda arrikeeda guud iyo in loo dagaallamo mus'uuliyad ka dhexeysa dadkeeda oo dhan, markastuu siyaado wacyiga bulshada xagga qiimaha arrinka guud iyo halistiisa waxaa siyaadaya iskaashiga iyo isgaraqabsiga iyo isku xirnaanta si loo ilaalin lahaa taas,

bulshada waxaa u suurtoobaysa awoodda dhismaha halka ah iyo dareenka jirka halka ah, kasoo uu nagu boorriyay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - markuu yiri:

(الْمُؤْمِنُ لِلْمُؤْمِنِ كَالْبُنْيَانِ ، يَشُدُّ بَعْضُهُ بَعْضًا ، وَشَبَّكَ بَيْنَ أَصَابِعِهِ)

(**Mu'minka mu'minka kale wuxuu u yahay sida dhismaha oo kale qaarkii qaarka kale ayuu xoojiyaa, wuxuu is dhexgaliyay farihiisa**)

Wuxuu yiri:

( مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ وَتَرَاحُمِهِمْ وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ ؛ إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالْحُمَّى)

(**Mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu dhimrintooda waa sida jirka oo kale, marka xubin ka sheegato jirka oo dhan dhafar iyo qandho ayuu ka sheegtaa**)

Waxaan shaki ku jirin inuu yahay kan ugu muhimsan dhowridda arrinka guud: in laga hormariyo maslaxadda guud oo ballaaran oo waxtarkeeda usoo noqonaya dhhammaan dadka lagana hormariyo maslaxadda gaar oo cirriiriga ah oo waxtarkeeda usoo noqonaya dadkeeda kaliya, si looga badbaadiyo nafta aadanaha sharta anaaniyadda, taas oo ah danta guud inay keenayso waxkastoo xaqiijinaya in bulshada nolol loo keeno xagga arrimaha maaddiga iyo xagga macnaha,

khayr ay dadka u keenayso iyo waxtar, kana reebayso shar iyo xumaan dalkana ilaalinayso iyo xasilloonidiisa iyo nabadgalyada dhulkiisa, shaki kuma jiro in xaqiijinta maslaxadda umadda iyo dhammaan bulshada ay keenayso fiqiga kala mudnaanta, Quraanka kariimka wuxuu adkeeyay in dhowridda danta guud iyo kahormarinteeda danaha gaarka ay tahay waddada rususha iyo anbiyada dhammaan, Ilaahay umasoo dirin nabi iyo rasuul inuu liibaan u keeno dadkiisa waxaan ahayn iyo inuu khayr u xaqiijiyo asoo aan rabin wax qarash ah ama dan adduunyo, wuxuu yiri Alle asoo ku hadlaya carrabka nabigiisa Nuux - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**{وَيَا قَوْمِ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ مَالًا إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى اللَّهِ وَمَا أَنَا بِطَارِدِ الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّهُمْ مُلَاقُو رَبِّهِمْ وَلَكِنِّي أَرَاكُمْ قَوْمًا تَجْهَلُونَ}**

(**Qoomkayow idin warsan maayo xoolo, ajirkayga Allaa haya, mana eryayo kuwa xaqqa rumeeyey illeen iyagu waxayla kulmi rabbigooda, waxaanse idinku arkaa dad Jaahiliina**)

Wuxuu yiri subxaanahu asoo ku hadlaya carrabka nabigiisa Huud - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**{يَا قَوْمِ لَا أَسْأَلُكُمْ عَلَيْهِ أَجْرًا إِنْ أَجْرِيَ إِلَّا عَلَى الَّذِي فَطَرَنِي أَفَلَا تَعْقِلُونَ}**

(**Qoomkayow idinka warsan maayo xaqa ujuuro ujuuradayda waxaan uun ka mutaa Allaha i abuuray ee miyeydaan wax kasayn**)

Wuxuu yiri asoo ku hadlaya carrabka sayidkeena Shacayb - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**{إِنْ أُرِيدُ إِلَّا الْإِصْلَاحَ مَا اسْتَطَعْتُ وَمَا تَوْفِيقِي إِلَّا بِاللَّهِ عَلَيْهِ تَوَكَّلْتُ وَإِلَيْهِ أُنِيبُ}**

(**Ma doonayo waxaan wanaajin ahayn, intaan karo, waafajintaydana waxaan Alle ahayn ma karo isagaana talo saartay xaggiisaana u noqon**)

Sharciga xaniifka wuxuu la yimid wax waafaqaya caqliga oo munaasib ku ah, wuxuu ku boorriyay arrimo oo u keeni kara maslaxad guud bulshada oo dhan, waxaa ka mid ah: in loo yeelo baahida bulshada daruuriga ah iyo in la ilaaliyo fahanka waaqaca, haddii bulshada ay u baahan tahay isbitaallo iyo qalabayntooda in loo dhiso sidii loogu daaweyn lahaa looguna daryeeli lahaa dadka saboolka ah, mudnaanta waa sidaas, hadday tahay baahida bulshada in loo dhiso dugsiyo iyo macaahid iyo dayactirkooda iyo diyaarintooda iyo waxsiinta ardayda iyo daryeelkooda mudnaanta waa sidaas, hadday tahay baahida in loo fududeeyo dadka dhibban guurka iyo in laga gudo deynta dadka lagu leeyahay deynta iyo kurbada in laga qaado dadka qaan loo haysto mudanaanta waa sidaas, dadka in loo fuliyo danahooda iyo in loo sameeyo waxa ay u baahan yihiin

waxay ka mid tahay waajibka sharciga iyo wadaniga wuxuu leeyahay arsuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - :

**(مَا آمَنَ بِي مَنْ بَاتَ شَبْعَانَ ، وَجَارُهُ جَائِعٌ إِلَى جَنْبِهِ ، وَهُوَ يَعْلَمُ)**

(**Ima rummaynin qofkii bariyo asoo dersikiisa dhiniciisa ku gaajaysan yahay asoo og**).

Waxaa ka mid ah in la dhowro hantida guud, waa waxa ay wadaagayaan muwaadiniinta dhamaantooda, xurmada hantida guud waxay ka daran tahay xurmada hantida gaar, maxaayeelay xuquuq badan ayaa la xiriirta, dadka xaqqa ku leh oo badan, sidaa awgeed islaamka wuxuu ka digay in la halleeyo hantidaas ama la xado ama dhib loo geysto wuxuu yiri Alle:

**{وَمَنْ يَغْلُلْ يَأْتِ بِمَا غَلَّ يَوْمَ الْقِيَامَةِ ثُمَّ تُوَفي كُلُّ نَفْسٍ مَا كَسَبَتْ وَهُمْ لاَ يُظْلَمُونَ}**

(**Ruuxii wax khayaama wuu la imaan wuxuu khayaamay maalinta qiyaame, markaas waxaa loo oofin nafkasta waxay kasbatay lagamana dulmiyo**.)

hantida guud dadkoo dhan ayaa iska leh, koox gaar iskama laha, dadka u qumaya waa dad ay amaano ku tahay dhowriddeeda iyo soo ururinteeda iyo in la siiyo dadka loogu talaggalay qof uma bannaana inuu ku xadgudbo ama uu ka qaato wax uusan mutaysanin, maxaayeelay taas waxaa lagu tiriyaa khiyaano iyo dulmi inay tahay iyo cunidda dadka hantidooda lagu cuno si

baadil ah, sidoo kale Islaamka wuxuu amray in la ilaaliyo waxyaalaha dadka ka dhexeeyo sida meelaha cibaadada iyo dugsiyada iyo isbitaallada iyo darjiinada iwm. waxaa is ka leh dhammaan, waxtarkoodana wuxuu usoo noqonayaa dadkoo dhan, wuxuu ka digay digniinta ugu darneyd in lagu xadgudbo ama la dayaco, ama la halleeyo si kaste ahaatee, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{وَلَا تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَاحِهَا}**

(**Hana fasaadinina Dhulka inta la Wanaajiyey ka dib**)

Si aysan ugu malaynin dadka qaarkooda inay u bannaan tahay hantida guud siduu rabo inuu uga faa'ideysan karo iyo qaabkuu rabo, asoo ku marmarsiyo ka dhiganayo inuu wax ku leeyahay, waa fahan qaldan, waxaa laynaga rabaa inaan dhowrno waxyaabaha dadka ka dhexeeya, in la ilaaliyo iyo in la kobciyo lana hormariyo, maxaayeelay qof kaliya iskama laha koox kaliyana iskama laha waqti gaar ah, dhammaanteena ayaa iska leh iyo jiilka soo socda.

Waxaa ka mid ah in la ilaaliyo waddada, xaqqeedana la dhowro, wuxuu yiri rasuulka:

**(إِيَّاكُمْ وَالْجُلُوسَ في الطُّرُقَاتِ) ، قَالُوا : يَا رَسُولَ اللَّهِ ، مَا لَنَا بُدٌّ مِنْ مَجَالِسِنَا ، نَتَحَدَّثُ فِيهَا ، قَالَ رَسُولُ اللَّهِ (صلى الله عليه وسلم) : (فَإِذَا أَبَيْتُمْ إِلاَّ الْمَجْلِسَ ، فَأَعْطُوا الطَّرِيقَ حَقَّهُ) ، قَالُوا : وَمَا حَقُّهُ ؟ قَالَ : (غَضُّ الْبَصَرِ ، وَكَفُّ الأَذَى ، وَرَدُّ السَّلاَمِ ، وَالأَمْرُ بِالْمَعْرُوفِ ، وَالنَّهْىُ عَنِ الْمُنْكَرِ) ،**

(**Iska jira inaad fariisataan jidadka)**, waxay dheheen rasuulkii allow kama maarmi karno, waan ku sheekeysanaa, wuxuu yiri rasuulka: (**haddii aad diiddeen inaad fariisataan mooyee siiya jidka xaqiisa**), waxay dhaheen: waa maxay xaqiisa wuxuu yiri: (**laabashada aragga, joojinta dhibka, jawaabta salaanta, faridda wanaagga iyo reebidda xumaanta**)

Wuxuu yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(الإِيمَانُ بِضْعٌ وَسَبْعُونَ - أَوْ بِضْعٌ وَسِتُّونَ - شُعْبَةً ، فَأَفْضَلُهَا قَوْلُ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ ، وَأَدْنَاهَا إِمَاطَةُ الأَذَى عَنِ الطَّرِيقِ ، وَالْحَيَاءُ شُعْبَةٌ مِنَ الإِيمَانِ)**

(**Iimaanka waa toddobaatan iyo dhowr ama lixdan iyo dhowr qeyb, waxaa ugu fiican oraahda laa ilaaha illallaah, waxaana ugu hooseeya in jidka qashinka laga leexiyo, xishoodkana waa qeyb ka mid ah iimaanka**).

Waxaa ka mid ah gudashada adeegga dalka oo lagu tiriyo waxyaalaha ugu muhimsan oo qofka sameeyo xagga diintiisa iyo dalkiisa, waxay daliil u tahay dalkiisa inuu ku xiran yahay iyo dhabta sheegashadiisa iyo jacaylka uu jecel yahay, dalka iyo sharafta maha kuwa kaga sahlan muslinka agtiisa naftiisa iyo hantidiisa iyo alaabtiisa, sidoo kale adeegga wuxuu dadka macnaha raganimada iyo kartida iyo xilkasnimada iyo qiyamka wanaagsan oo diinteena ay la timid, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(عَيْنَانِ لَا تَمَسُّهُمَا النَّارُ ؛ عَيْنٌ بَكَتْ مِنْ خَشْيَةِ اللهِ ، وَعَيْنٌ بَاتَتْ تَحْرُسُ فِي سَبِيلِ اللهِ)**

(**Labo indhood naar ma taabanayso il Alle dartii u ooysay iyo il barisay iyadoo dar Alle wax u ilaalinayso**).

Waxaa ka mid ah danta guud oo ay waajib tahay in la dhowro - iyadoo la ilaalinayo arrinka guud - waxa ka dhexeeya dowladda iyo dowladaha kale ama ururada ama mu'sasooyinka dibadda oo ah heshiisyo: dhaqaaq kaste fiqi ah ama fatwo ah ama fikri ah ama dacwo la xiriira waxaa lagama maarmaan ah inuu ahaado dhaqaaq mu'asaso ku salaysan oo kasoo fulaya madaxda ama qofkii iyaga matalaya, qofka ka hadlaya arrimahan oo kale waa inuu galiyaa maskaxdiisa dhammaan xaaladaha bulshada iyo dalka iyo caalamka oo la xiriira arrinka uu ka hadlayo, si ayna ulasoo bixin qaar ka mid ah fatwooyinka iyo aragtiyada kaliga ah oo degdegga leh wax ka hor imaanaya waaqaca ama ka hor imaanaya qaanuunka iyo heshiisyada dowliga ah, wuxuu na amray Alle subxaanahu wataacalaa inaan oofino heshiisyada wuxuu yiri:

**{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا أَوْفُوا بِالْعُقُودِ}**

(**Kuwa (xaqa) rumeeyoow oofiya ballanka**)

Aayaddan sharafta leh guud ahaan waxaa soo galaya dhammaan heshiisyada iyo ballamada, iyo wixii qofka ballan kula galayo qofka kale, wuxuu leeyahay

nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee-
:

(الْمُسْلِمُونَ عِنْدَ شُرُوطِهِمْ، إِلاَّ شَرْطًا حَرَّمَ حَلاَلاً، أَوْ شَرْطًا أَحَلَّ حَرَامًا)

(**Muslimiinta waxaa ka dhexeeya shuruudahooda, shardi xalaal xarrimay mooyee ama shardi xalaaleeyay xaaraan** ).

Waa kanaa rasuulka Alle wuxuu celinayaa Abuu Basiir -Ilaahay raalli haka noqdee - heshiiska Xudeybiya kaddib asoo raacaya heshiiska ka dhexeeyay isaga iyo Qureysh, iyadoo ay dhici karto saxaabiga inuu dhib la kulmo, waxay ka ahayd ilaalinta heshiiska uu Qureysh la galay, tan waxay ka mid tahay oofinta ballanka dhinac marka laga eego, dhinaca kalana waxay ka mid tahay hormarinta danta guud.

In laga hadlo arrinka guud - iyadoo garasho iyo fahan aan jirin - waxay leedahay halis oo dowladda dumin karta, waxay ka dhigaysaa amaanka dalka iyo xasilloonidiisa mid baylah ah iyo wax lagu jeesjeeso, buuqa ayaa badanaya qof wax garanaynin ayaa ka hadlaya wax uusan ogeyn maxaa ka badan kuwa kutirikuteenka faafiya oo dhulka fasahaadiya oo aan hagaajinin, Alle wuxuu na amray inaan u celino arrinka dadkiisa wuxuu yiri subxaanahu:

**{وَإِذَا جَاءَهُمْ أَمْرٌ مِّنَ الْأَمْنِ أَوِ الْخَوْفِ أَذَاعُوا بِهِ وَلَوْ رَدُّوهُ إِلَى الرَّسُولِ وَإِلَى أُولِي الْأَمْرِ مِنْهُمْ لَعَلِمَهُ الَّذِينَ يَسْتَنبِطُونَهُ مِنْهُمْ وَلَوْلَا فَضْلُ اللَّهِ عَلَيْكُمْ وَرَحْمَتُهُ لَاتَّبَعْتُمُ الشَّيْطَانَ إِلَّا قَلِيلًا}**

(**Markuu u yimaaddo amar nabadgalyo ah ama cabsi way faafiyaan hadday u celiyaan xagga rasuulka ama kuwa cilmiga leh oo ka mid ah waxaa ogaan lahaa kuwa la soo baxa (dhabta) oo ka mid ah, hadduusan jirin fadliga Ilaahay korkiinna ah iyo naxariistiisa waad raaci lahaydeen shaydaan wax yar mooyee**)

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato midka lagu khatimay anbiyada Ilaahay iyo rusushiisa sayidkeena Muxamed ah isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa oo dhan iyo dadkii wanaag ku raacay ilaa maalinta baalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Fahanka arrinka guud wuxuu dhaafaa ku dadaalka shakhsiga wuxuu u gudbaa ku dadaalka dhammaan

dadka, sidaa awgeed arrinkiisa dadkoo dhan ma oga waxaa la socda dadka takhasuska u leh, waxay og yihiin waxa loo tiiriyay qiimihiisa oo la xiriira amaanka dalka iyo nolosha dadka iyo dantooda iyo dalka iyo dalalka waxa ku sugan iyo wadcigooda goboleed iyo kan dowligaba iyo arrinkooda siyaasadeed iyo bulshada iyo amniga iyo aqoonta iwm. dadka aqoonta leh waxay isku waafaqsan yihiin in qofka mujtahidka hadduu ku ijtihaado takhasuskiisa oo uu qaldamo inuu hal ajar leeyahay, hadduu ijtihaado uuna saxo labo ajar inuu leeyahay, cagsiga laga fahmayo wuxuu keenayaa qofkii aan aqoon lahayn hadduu ku ijtihaado wax uusan takhasus u lahayn ama aqoon, hadduu ijtihaado uuna saxo dambi ayaa korkiisa ahaanayo dhiirranaantiisa awgeed uu ku dhiirraday fatwada uusan aqoonta u lahayn haddii uu ijtihaado uuna qaldo labo dambi ayuu galayaa dambi qaladkiisa dartii dambiga kalana dhiirranaanta uu ku dhiirraday fatwada ku salaysan aqoon la'aanta, taasoo ah Islaamka inuu ku dadaalayo tixgalinta dadka aqoonta iyo takhasuska leh, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

**{فَاسْأَلُوا أَهْلَ الذِّكْرِ إِن كُنتُمْ لَا تَعْلَمُونَ}**

(**Ee warsada kuwa cilmiga leh haddaydaan wax ogayn**)

Ahlu digriga waxaa laga wadaa dadka aqoonta iyo takhasuska leh, aqoon kaste qaabka ay tahayba

Sidaa awgeed waxaa layska reebay in lagu degdego fatwada aqoon la'aan ama iyadoon wadadnin tiir sharci ah, wuxuu yiri Alle:

**{فَمَنْ أَظْلَمُ مِمَّنِ افْتَرَى عَلَى اللَّهِ كَذِبًا لِيُضِلَّ النَّاسَ بِغَيْرِ عِلْمٍ إِنَّ اللَّهَ لا يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ}**

(**Yaase ka dulmi badan cid ku abuuratay Alle si uu u dhumiyo dadka cilmi darro, Allana ma hanuuniyo qoom daalimiina**)

Wuxuu yiri subxaanahu:

**{وَلا تَقُولُوا لِمَا تَصِفُ أَلْسِنَتُكُمُ الْكَذِبَ هَذَا حَلَالٌ وَهَذَا حَرَامٌ لِّتَفْتَرُوا عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ إِنَّ الَّذِينَ يَفْتَرُونَ عَلَى اللَّهِ الْكَذِبَ لا يُفْلِحُونَ * مَتَاعٌ قَلِيلٌ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ}**

(**Ha dhihina wuxuu carrabkiina ku tilmaani been kani waa xalaal kanna waa xaaraan, inaad ku been abuurataan Alle, kuwa ku been abuurta Alle ma liibaanaan * waa nolol yar (Adduunku) waxayna leeyihiin cadaab daran**)

Wuxuu leeyahaya nabigeena:

**(مَنْ أُفْتِيَ بِغَيْرِ عِلْمٍ كَانَ إِثْمُهُ عَلَى مَنْ أَفْتَاهُ)**

(**Qofkii aqoon la'aan loo fatwoodo wuxuu saran yahay dambigiisa kii u fatwooday**)

Asxaabta iyo taabiciinta kuwooda waaweyn waxay dhibsan jireen fatwada ogaanshaha ay og yihiin dartii inay halis tahay, waa kanaa Abuubakar sidiiq -Ilaahay raalli haka noqdee - oo leh: "cirkee ii haraynaya ? dhulkee i qaadaya? haddii aan kaga hadlo kitaabka Alle aqoon la'aan" waxaa la weyddiiyay Ashacbi - Alle ha u

naxariistee - mas'alo wuxuu yiri: ma garanayo asxaabtiisa waxay ku dhaheen: dartaada ayaan u xishoonay, wuxuu yiri: laakin malaa'igta kama xishoonin markay tiri:

**{لَا عِلْمَ لَنَا إِلَّا مَا عَلَّمْتَنَا}**

(**Aqoon ma lihin waxaad na bartay mooyee**)

Cabdiraxmaan bin Abii Layla - Alle ha u naxariistee - wuxuu yiri: waxaan soo gaaray boqol iyo labaatan Ansaar oo ka mid ah asxaabta rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - midkooda ayaa la weyddiinayaa mas'alo wuxuu u celinayaa midkan, midkanna wuxuu u celinayaa midkan ilaa ay ugu noqoto kan hore.

Dhowridda arrinka guud waa msa'uuliyad oo dadka dhan ka dhexeysa, qof kaste waa meesha uu joogo iyo awooddiisa, wuxuu leeyahay nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(كُلُّكُمْ رَاعٍ ، وَكُلُّكُمْ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ ؛ الإِمَامُ رَاعٍ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ ، وَالرَّجُلُ رَاعٍ فِي أَهْلِهِ وَهُوَ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ ، وَالْمَرْأَةُ رَاعِيَةٌ فِي بَيْتِ زَوْجِهَا وَمَسْئُولَةٌ عَنْ رَعِيَّتِهَا ، وَالْخَادِمُ رَاعٍ فِي مَالِ سَيِّدِهِ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ)**

(**Dhammaantiina waxaad tihiin ilaaliye, mid kastana waxaa la weyddiinayaa ilaaladiisa, imaamka waa**

**ilaaliye iyo mas'uul waxaa la weyddiinayaa ilaaladiisa, ninkana waa Ilaaliyaha ehelkiisa waxaana la weyddiinayaa ilaaladiisa, haweeneydana waa ilaalisada guriga ninkeeda waxaana la weydiinayaa ilaaladeeda, adeegahana waa ilaaliyaha hantida sayidkiisa waxaana la weyddiinayaa ilaaladiisa**).

Dad badan ayaa fududeysta waxay ku hadlayaan ama ay qorayaan ama ay dad kale kula wadaagayaan baraha bulshada, dadka qaarkooda waxay u arakaan madadaalo mana oga handisidda warka kutirkuteenka iyo faafintiisa inay tahay waxyaalaha wax lagu dumiyo oo ay adeegsadaan dadka baadilka wata markay la dagaallamayaan dadka xaqqa wata, waxaad arkaysaa ummad hal ah oo qaar qaarka kale shaki ka galinaya qaaarna qaarka kale khiyaano u tiirinaya, sidaa awgeed wuxuu yiri nabiga:

**(كَفَى بِالْمَرْءِ كَذِبًا أَنْ يُحَدِّثَ بِكُلِّ مَا سَمِعَ)**

(**Qofka been waxaa ku filan inuu sheego waxkastoo uu maqlo**)

Qofka markuu ku hadlo wax kaste uu maqlo hadday tahay nooc ka mid ah noocyada beenta oo qofka sheegaya loona ciqaabayo ciqaab daran aakhiro, siduu yahay qof ku hadlaya wax uusan arkin ama maqlin aqoonna aan u lahayn si been iyo masabidaad iyo been abuur ay ka tahay? wuxuu leeyahay anbigeena:

( إِنَّ العَبْدَ لَيَتَكَلَّمُ بِالكَلِمَةِ مِنْ رِضْوَانِ اللَّهِ ، لاَ يُلْقِي لَهَا بَالًا ، يَرْفَعُهُ اللَّهُ بِهَا دَرَجَاتٍ ، وَإِنَّ العَبْدَ لَيَتَكَلَّمُ بِالكَلِمَةِ مِنْ سَخَطِ اللَّهِ ، لاَ يُلْقِي لَهَا بَالًا ، يَهْوِي بِهَا فِي جَهَنَّمَ)

(**Addoonka wuxuu ku hadlayaa erey oo ka mid ah raalliga Alle asoon ka war haynin Ilaahayna darajooyinka uyuu ugu kordhinayaa, addoonka wuxuu ku hadlayaa erey ka mid ah carada Ilaahay asoon ka war haynin, naarta Jahannamo ayuu ugu dhacayaa**).

Taasoo naga rabto digtoonaan iyo is ilaalin iyo caqli iyo inaynan tiimbanin wax aynan aqoon u lahayn ama fatwada aqoon la'aanta ah Ilaahay wuxuu na amray inaan hubsano aynan daba ordin kuwa wax dumiya inaan ka salgaarno wararka nasoo gaaraya, wuxuu leeyahay Alle:

{يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنْ جَاءَكُمْ فَاسِقٌ بِنَبَإٍ فَتَبَيَّنُوا أَنْ تُصِيبُوا قَوْمًا بِجَهَالَةٍ فَتُصْبِحُوا عَلَى مَا فَعَلْتُمْ نَادِمِينَ}

(**Kuwa xaqa rumeeyow hadduu idiinla yimaaddo faasiq war, hubsada, si aydaan dad u dhibin ogaansho la'aan, markaasna aad ka shallaydaan waxaad fasheen**)

Wuxuu leeyahay rasuulka:

(التَّأَنِّي مِنَ اللهِ ، وَالْعَجَلَةُ مِنَ الشَّيْطَانِ)

(**Deganaanta waa xagga Alle degdegana waa xagga shaydaanka**)

Wuxuu kaloo leeyahay:

(التُّؤَدَةُ فِي كُلِّ شَيْءٍ إِلَّا فِي عَمَلِ الْآخِرَةِ) .

(**Xasilloonida meel kaste ayay ku jirtaa camalka aakhira mooyee**).

Maxaa inooga baahi badan inaynu ogaano qiimaha arrinka guud iyo in la hormariyo danta guud, iyo in la ogaado halista laynoo maleegayo oona la rabo inaan ku taraaraxno sida kuwa kale aan ku cibraqaadano dadka kale, fursahadaasna aan ka burburino cadowga diinta iyo dalka, aan ku sugnaano xaqqa annagoo midaysan, si aynan ugu dhicin dhagarta cadowgeena oo na gaadaya, kalasoonina aan ku faafino dhexdeena aan iskugu kaashano khayr kaste waxtar u leh dadkoo dhan.

**Ilaahayow na waafaji gudashada xaqqa dalkeena, dadkeenana Ilaali iyo madaxdeena iyo ciidankeena iyo nabadsugiddeena, Masarteena qiimaha lehna ka dhig nabad iyo amaan iyo bashbash iyo barwaaqo iyo dhammaan dalalka caalamka.**